

Sunt a unugy ad a dhiiga – ket o a cido SiS

(lakabyo aashito ah oo kudhex samaysma qulqulka dhiiga sabab laxariirta insulin-ta oo qofka kuyaraata)

calaamad aha hore:

- Kaadi xad dhaaf ah
- Oon xad dhaaf ah
- Af qalalan
- Sonkorta dhiiga oo kor ukacda

astaamo daran:

- Baahi xad dhaaf ah
- Tamar la'aan
- Neefta oo kudhibta
- Calool xanuun
- Lalabo/matag
- Astaamaha shubanka
- Sunta neefta
- Dareen heer niyad leh, koomo



goorma ayay taha y inaad dib u cabirt oo heerarka qaab dhi Smeedka dhiigaa ga?

Cabir heerarka qaab dhismeedka dhiigaaga marka heerarkan sonkorta dhiigaagu ay noqdaan 14mmol/l ama kabataan, ama markaad xanuun dareento adoon garanayn sababta.

Sida aad uga j a waab ay So Sonk ort a kaladuwan ee dhiiga kujirt a iy o xeerarka qaab dhi Smeedkadhiiga*

	Sonkorta dhiigu waa 14 mmol/l ama kahoos	Sonkorta dhiigu waa 14 mmol/l ama kabadan
Qaab dhismeedyada dhiiga 3.0mmol/l ah ama kasareeya	Halis daran oo keeni karta ketoacidosis. Isla markaba laxariir dhakhtar.	Halis daran oo keeni karta ketoacidosis. Isla markaba laxariir dhakhtar.
Qaab dhismeedyada dhiiga 1.5-2.9mmol/l	Waxaad ubaahan tahay kaarboohaydareetyo degdeg ah iyo sida macquulka ah insulin dheeri ah**. Halis keeni karta ketoacidosis, laxariir dhakhtar.	Waxaad ubaahan tahay insulin badan**. Raac tilmaamaha ay kusiiyaan kooxdaada sokoroowgu. Halis keeni karta ketoacidosis, laxariir dhakhtar.
Qaab dhismeedyada dhiiga 0.6-1.4mmol/l	Waxaad ubaahan tahay kaarboohaydareetyo degdeg ah iyo sida macquulka ah insulin dheeri ah**. Dib ubilooow lasocoshada sonkorta dhiiga iyo heerarka qaab dhismeedka dhiiga kadib 1-2 saacadoodba.	Waxaad ubaahan tahay insulin badan**. Raac tilmaamaha ay kusiiyaan kooxdaada sonkoroowga. Lasoco sonkorta dhiigaaga iyo heerarka qaab dhismeedka dhiiga kadib 1-2 saacadoodba.
Qaab dhismeedyada dhiiga oo kahooseeya 0.6mmol/l	Haddii aysan jirin astaamo muujinaaya ketoacidosis, raadi waxyaabaha kale ee xanuunkaaga keenaaya.	Majiraan astaamo muujinaaya ketoacidosis. Lasoco sonkorta dhiigaaga iyo heerarka qaab dhismeedka dhiiga markale kadib 1-2 saacadoodba.

*Sida Kucad Tilaamaha Talo Bixinta Shaqada Caafimaadka ee ISPAD oo soo baxday 2009. Tilmaamaha qaranka Sweden ee sharaxaada heerarka qaab dhismeedka dhiiga wali lamasoo daabacin.

**Heerarka qaab dhismeedka jirku way kici karaan saacadaha koobaad kadib markaad insulin dheeri ah iskudurto, laakiin intaas kadib hoos ayay usoo dhacayaan.

SONKORTA DHIIG YARIDA

Kor ukac xawli kusocda (Sonkorta dhiiga oo kahoosaysa 3.5-4.0 mmol/l)

ASTAAMAHA:

- Dhidid, madax xanuun, caajis
- Gaajo
- Gariiritaan
- Wadno garaac badan
- Qofka oon waxba diirada saari karin
- Xanaaq, dabeecad xumo
- Dawakhsanaan

DAAWAYNTA:

- **Marka astaamuhu yar yihiin** qaado kaniiniyada dextrose, ama cuntooyika carbohydrates ka sida cabitaanada sonkorta leh ama juuska.
- **Haddii xanuunku daranyahay** ama haduu jiro wax kabadan 10 - 15 daqiiqo, kuceli/qaado cadad dheeraad ah oo carbohydrates ah.

Haddii cuntadaada xigta aad ucunaysi mudo kafog 30-45 daqiiqo waxaad ubaahan kartaa cunto fudud si aad uga hortagto in xanuunku markale kugusoo kaco.

Hacabin cabitaano haddii aadan wax liqi karin.

- Markaad qabto astaama sida jirago' ama miyir dabool, **si degdeg ah ulaxiriir dhakhtarka/isbitaalka!**

WAXYAABAHA SABABA:

- Cunista sonkor badan
- Cunto yaraan, cuntada oo ladib dhigo
- Shaqada jirka ayadoon laqaadan carbohydrates dheeraad ah ama insuliinta oo layareeyo
- Alkolada

SONKORTA DHIIGA OO KACDA

Ketoacidosis, kor ukac hooseeya

ASTAAMAHA:

- Oonka xad dhaafka ah
- Cadadka kaadida oo bata
- Daalka
- Arag xumada
- Oomiteed xumada
- Lalabo
- Matag
- Calool xanuun
- Afka oo soo ura ama acetone
- Naqaska oo qofka kudhaga

DAAWAYNTA:

- Cabir sonkorta dhiiga iyo ketones ka kujira dhiiga
- Sii bukaanka insulin iyo, haday muhiim tahay, carbohydrates degdeg ah
- Gee qofka isbitaal ama daryeel caafimaad

WAXYAABAHA SABABA:

- Infakshanka, heer kulka
- Insulin kufilan oon lacunin
- Cadad khaldan oo insulin iyo cuntooyin ah oo lacunay
- Cilad kajira xididada insulinta jirka siiya
- Daawada SGLT-2 ee xakamaysa ayaaqarin karta ketoacidosis

dhakhtarkayga/kalkaalisadayda Lambarka taleefoonka